Calgary

# Vehicle for Hire

**WARGAYSKA#005**
**ISBEDDELADA LACAGTA SHATIGA EE 2026**

**2025 DIISAMBAR**

---

Istaraatiijiyadda Kala-guurka Vehicle-for-Hire waxaa ansixiyay Golaha Magaalada 18-kii Juun, 2024. Istaraatiijiyadda kala-guurka waxay qeexaysaa horumarka barnaamijka ee ay fulin doonto kooxda Vehicle for Hire. Iyadoo qayb ka ah, Magaalada Calgary waxay shaqaaleysiisay koox dibadda ah si ay u qiimeeyaan sida xeerarka horumarrada warshadaha ee dhawaan ay u beddeleen sida adeegyada loo bixiyo, iyo sida isbeddeladaas ay u saameeyeen kharashaadka barnaamijka Vehicle for Hire (VFH).

Ujeeddada dib-u-eegista waxay ahayd in la sameeyo jadwal lacageed oo cusub oo si cadaalad ah u qaybiya kharashyada, iyadoo la xaqiijinayo xasiloonida dhaqaale ee barnaamijka VFH.

SIdaas awgeed, Vehicle for Hire waxay ku faraxsan tahay inay ku dhawaaqdo dhimista Lacagaha badan ee Vehicle for Hire laga bilaabo Janaayo 1, 2026. Golaha Magaalada Calgary ayaa ansixiyay jadwalka khidmadaha hoos ku xusan ee xeer hoosaadka Vehicle for Hire 20M2021.

Fadlan wixii su'aalo ah noogu soo dir iimaylka VFHlicensing@calgary.ca

Farriintan waxaa loo turjumay Amxaari, Carabi, Faransiis, Hindi, Bunjaabi, Soomaali iyo Urduu. Riix halkan si aad u aragto dokumentiyada.

Mahadsanid,

**Cory Porter**
Guddoomiye Ku xigeenka, Vehicle for Hire
Maaraynta Xaaladaha Degdega ah iyo Amniga Bulshadda